# Tobanka dambe iyo fiqiga kala mudnaanta waaqaceena xaadirka ah

Mahad Allaa iska leh, Allaha Caalamka oo kitaabkiisa Kariimka ku yiri:

**{سَابِقُوا إِلَى مَغْفِرَةٍ مِنْ رَبِّكُمْ وَجَنَّةٍ عَرْضُهَا كَعَرْضِ السَّمَاءِ وَالْأَرْضِ أُعِدَّتْ لِلَّذِينَ آمَنُوا بِاللَّهِ وَرُسُلِهِ}،**

**(U orotama Dambidhaafka Alle iyo Janno ballarkeedu yahay ballarka cirka iyo dhulka oo kale, loona darbay kuwa rumeeyay Alle iyo Rusushiisa)**

Waxaan qirayaa inuusan jirin Ilaah kale Alle mooyee oo aan lahayn mid wax la wadaago, waxaana qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena Muxammad addoonkiisa uu yahay iyo rasuulkiisa, Allow nabadgalyo iyo naxariis iyo barako korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa iyo qofkii ku raacay wanaag ilaa maalinta qiyaame

Intaas kaddib:

Waxaa ka mid ah naxariista Allaha sarreeya uu u naxariisto addoomihiisa inuu ka dhigay tobanka dambe bisha Ramadaan ee barakaysan xilli xasanaadka la laballaabo, iyo xilli lagu tartamo khayraadka; illeen nafta firfircooni ayay dareemaysaa marka dhamaadka soo dhowaado, nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) wuxuu ahaa mid ka faa'ideysanaya waqtiyadaas fadliga badan, waxay leedahay saiyda Caa'isho (Alle raalli haka noqdee): rasuulkii Alle (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) wuxuu ku dadaali jiray tobanka dambe siduusan ugu dadaalin maalmaha kale, waxay leedahay (Alle

raalli haka noqdee): rasuulkii Alle (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) wuxuu ahaa markii tobanka ay soo galaan mid nooleeya habeenka, ehelkiisana kiciya, oo dadaala hoosguntigana dhuujiya.

Kudayashada nabiga (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) waxaa ka mid ah in lagu nooleeyo habeennada tobanka dambe ee Ramadaan salaad iyo Quraan akhris, xus, istiqfaar, iyo in meelaha khayrka wax lagu bixiyo, waana dhaqanka dadka suubban, iyo addoomaha Alle dhowrsan, wuxuu leeyahay Allaha xaqqa ah (SW) asoo sifeynaya dadka jannada galaya:

**{تَتَجَافَى جُنُوبُهُمْ عَنِ الْمَضَاجِعِ يَدْعُونَ رَبَّهُمْ خَوْفًا وَطَمَعًا وَمِمَّا رَزَقْنَاهُمْ يُنْفِقُونَ * فَلَا تَعْلَمُ نَفْسٌ مَا أُخْفِيَ لَهُمْ مِنْ قُرَّةِ أَعْيُنٍ جَزَاءً بِمَا كَانُوا يَعْمَلُونَ}،**

**(waxayna ka dheeraataa dhinacyadoodu jiifka iyagoo baryi Eebahood cabsi iyo rajaynba waxaan ku arzuqnayna wax ka bixiya * ma oga Nafu waxa loo qariyay kuwaas oo Indho ku qaboowsadaan abaal marin waxay camalfalayeen dartiis),** wuxuu leeyahay Alle (SW) asoo sifeynaya dadka dhowrsada:

**{إِنَّ الْمُتَّقِينَ فِي جَنَّاتٍ وَعُيُونٍ * آَخِذِينَ مَا آَتَاهُمْ رَبُّهُمْ إِنَّهُمْ كَانُوا قَبْلَ ذَلِكَ مُحْسِنِينَ * كَانُوا قَلِيلًا من اللَّيْلِ مَا يَهْجَعُونَ * وَبِالْأَسْحَارِ هُمْ يَسْتَغْفِرُونَ}،**

**(Kuwa dhawrsaday waxay ku sugnaan Jannooyin iyo Ilo * Iyagoo qaadan waxa Eebe siiyay, maxaayeelay waxay ahaayeen horay kuwo wanaag fala * Waxayna ahaayeen kuwo wax yar Habeenkii seexda * Waagana way dambi dhaaf waydiisanayeen.),** wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(عَلَيْكُمْ بِقِيَامِ اللَّيْلِ، فَإِنَّهُ دَأَبُ الصَّالِحِينَ قَبْلَكُمْ، وقُرْبَةٌ إِلَى اللهِ، وَمَنْهَاةٌ عَنِ الْإِثمِ، وَتَكْفِيرٌ لِلسَّيِّئَاتِ، ، وَمَطْرَدَةٌ لِلدَّاءِ عَنِ الْجَسَدِ).**

**(Waa korkiina ah salaatu leylka, waa dhaqanka dadka suubban oo idinka horreeyay, waana wax Alle loogu**

**dhowaado, dambigana way reebtaa, xumaantana waa lagu dhafaa, jirkana cudurka ayay ka fogeysaa)**

Haddii Ramadaan uu yahay bisha naarta layska xoreeyo, habeen ma jiro oo ka mid ah habeennadiisa oo Alle (cazza wa jalla) aan ugu sugnayn dad naarta laga xoreynayo, taas waxaa loogu rajo badan yahay loogana hubaal badan yahay tobankan, haddii rabbigeena (cazza wa jalla) uu u dhaafayo dadka hiraabtii istqfaarsada, naxariistan iyo dambidhaafkan maalmahan ayaa loogu rajo badan yahay, maxaayeelay waxaa ku sugan habeen Ilaahay (cazza wa jalla ) kareemeeyay oo ka sharfay habeennada kale, waana leylatu qadarka, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(تَحرُّوا ليلةَ القَدْر في العَشْر الأواخِر من رمضانَ).**

**(ku dadaala laylatu qadarka tobanka dambe ee Ramadaanka)**

Habeenkan barakaysan waa luulka habeennada, Alle wuxuu kusoo dejiyay nabi aad u weyn habeenkaas kitaab aad u weyn asoo loo soo dhiibay malag aad u weyn oona lagu soo dejiyay ummad aad u weyn, waa habeen dambidhaaf soo dego iyo naxariis iyo barako, wuxuu leeyahay Allaha xaqqa ah (SW):

**{إِنَّا أَنْزَلْنَاهُ فِي لَيْلَةِ الْقَدْرِ * وَمَا أَدْرَاكَ مَا لَيْلَةُ الْقَدْرِ * لَيْلَةُ الْقَدْرِ خَيْرٌ مِّنْ أَلْفِ شَهْرٍ * تَنَزَّلُ المَلاَئِكَةُ وَالرُّوحُ فِيهَا بِإِذْنِ رَبِّهِمْ مِنْ كُلِّ أَمْرٍ * سَلاَمٌ هِيَ حَتَّى مَطْلَعِ الفَجْرِ}**

**(Annagaa soo dajinnay Quraanka Habeenka LaylatulQadarka ah (sharafta leh) * Ma taqaanna LaylatulQadarka * Waa Habeen ka khayr badan Kun Bilood (oo kale) * Waxaana soo daga Malaa'igta (kale) iyo Malaku Jibriil habecnkaas idanka Eebe dartiis iyo amarkiisa * Waana Habeen nabadgalyo inta waagu ka baryi),** wuxuu

leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(مَنْ قَامَ لَيْلَةَ الْقَدْرِ إِيمَانًا وَاحْتِسَابًا غُفِرَ لَهُ مَا تَقَدَّمَ مِنْ ذَنْبِهِ).**

**(Qofkii laylatu qadarka istaago imaan iyo ajir raadis dartii waxaa loo dhaafaya dambigiisa wixii hormaray)**

Waxaan adkaynaynaa in quluubta laysu keeno iyo in sulxi la keeno waa sababka lagu aqbalo camalka suubban, khilaafka iyo dooddana waa waddada wax lagu waayo, siiba habeennadan fadliga badan, wuxuu leeyahay nabigeena naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(خَرَجْتُ لِأُخْبِرَكُمْ بلَيْلَةِ القَدْرِ، فَتَلَاحَى فُلَانٌ وفُلَانٌ، فَرُفِعَتْ- وعَسَى أنْ يَكونَ خَيْرًا لَكُمْ)،**

**(Laylatu qadarka ayaan usoo baxay inaan idin sheego hebel iyo hebel ayaa dooday waa la qaaday waxaa laga yaabaa inay khayr idin tahay),** wuxuu leeyahay nabiga (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(فِيهِ لَيْلَةٌ خَيْرٌ مِنْ أَلْفِ شَهْرٍ مَنْ حُرِمَ خَيْرَهَا فَقَدْ حُرِمَ).**

**(waxaa ku sugan habeen ka khayr badan ku bilood qofkii khayrkiisa laga qadiyo waa la qadiyay).**

****

Mahad oo dhan waxay u sugnaatay Allaha caalamka, naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato kan lagu khatimay nebiyada iyo rasuullada, sayidkeenna Muxammad (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee), iyo dhammaan ehelkiisa iyo asxaabtiisa.

Haddi albaabada daacada maalmahan iyo habeennadan barakeysan ay badan yihiin oo ay kala duwan yihiin, qofka caqliga lihi waa in uu hagaajiyaa waxyaabaha uu mudnaanta

siinayo, kana hormariyo wixii waxtarkiisa gudbaya waxa kooban. Haddaba, waxaa hubaal ah maalmahan in sakaatul-fidriga la bixinayo, waxaana mudan in la dedejiyo bixinteeda ciidda ka hor; iyadoo loo waasicinayo masaakiinta, danyarta, agoonta iyo dadka baahan, iyo sidii loo dabooli lahaa baahidooda inta aan la gaarin ciidda, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(أَغْنُوهُمْ عَنِ الطَّلَبِ فِي هَذَا اليَوْمِ)،**

**(wax raadinta ka deeqsiiya maalintan)**

Waa banaan tahay in  sakaatul fidriga qiimaheeda lacag ahaan loo bixiyo, lacagta caddaanka ahina ayaa u roon dadka danyarta ah ee ku nool bulshadeena iyo wakhtigeena, ugana balaadhan inay daboolaan baahidooda, isla markaana lagu xisaabtamo waxa dani ugu jirto masaakiinta oona ka mid ah ujeedooyinka shareecada.

Sidoo kale fiqiga kala mudnaanta wuxuu keenayaa in laga hormarsiiyo quudinta masaakiinta iyo fuqarada iyo in dadka baahan loo waasiciyo ku celcelinta xajka iyo cimrada, midka hore waa fardu ceyn ama fardu kifaaya, kan kalana waa sunno, waxaan shaki ku jirin in waajibka ha ahaado fardu ceyn ama fardu kifaayo uu ka horreyo dhammaan sunnooyinka, waxaa kuu sii dheer dadka kurbaysan in kurbada laga qaado ajir weyn in laga helo, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ahaatee):

**(أَحَبُّ النَّاسِ إِلَى اللَّهِ أَنْفَعُهُمْ لِلنَّاسِ، وَأَحَبُّ الْأَعْمَالِ إِلَى اللَّهِ سُرُورٌ تُدْخِلُهُ عَلَى مُسْلِمٍ، أَوْ تَكْشِفُ عَنْهُ كُرْبَةً، أَوْ تَقْضِي عَنْهُ دَيْنًا، أَوْ تَطْرُدُ عَنْهُ جُوعًا) ،**

**(Dadka waxaa loogu jecel yahay xagga Alle kuwa ugu dadka anafac badan, camalna waxaa loogu jecel yahay Alle agtii qof muslin aad farxad galinayso, ama aad kurbo ka feydayso, ama aad deyn ka gudayso, ama aad gaajo ka**

**eryinayso)**, wuxuu leeyahay nabiga (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(مَن نفَّس عن مؤمنٍ كربةً من كُرَب الدنيا، نفَّس الله عنه كربةً من كُرَب يوم القيامة).**

**(Qofkii mu'min ka feyda kurbo ka mid ah kurbadaha adduunka Alle ayaa ka feydaya kurbo ka mid ah kurbadaha maalinta qiyaame).**

**Ilaahayow naga aqbal soonkeena iyo istaaggeena dalkeena Masarna noo ilaali iyo dhammaan dalalka caalamka**